

Ku Saabsan Seattle Customer Service Bureau (Xafiiska Dawladda Adeega Macmiilka ee Seattle)

Magaalada Seattle waxa ayaminsantahay in qof kasta oo la xiriira dawladda magaalada in u helo adeeg aad u wanaagsan. Customer Service Bureau (Xafiiska Dawladda Adeega Macmiilka) ayaa sugaya in ay taasi dhacdo iyada oo ka caawinaysa in aad heshid macluumaad, xaliso dhibaatooyinka, oo isla markana wax ka qabta cabashooyinka.

Waxa aad wici karta **City Information and Complaint Line** (Khadka Macluumaadka iyo Cabashooyinka ee Magaalada) ee 206-684-CITY (2489) codka ama (TTY) 206-684-0476, waraq u qor PO Box 94726, Seattle, WA. 98124-4726, u-dir fakis 206-684-5529, ama buuxi foomka shabakada internetka adigo codsanaya adeeg/cabasho ee Customer Service Bureau Shabakada Internetku waa www.seattle.gov/customerservice/. Waxa aanu daganahay dabaqa kowaad ee Seattle City Hall ee 600 4th Avenue.

Bayaanka Hawl Qabadkayaga

Si aanu u caawino macmiilkayaga helidda awood adeegyada magaalada oo isla markana loogaadho guul caadilnimo, caddaalad, iyo adeeg macmiileed oo tusaale noqon kara ee dhammaan dawladda magaalada ee Seattle

Customer Service Bureau waxa u qabtaa

- Bixinta macluumaad iyo dad u-dirka waaxyaha dawladda haboon ee Magaalada.
- Gargaarida shakhsiyada in ay helaan adeegyada magaalada si caadilnimo ah oo isla markana hawl qabad fiican leh.
- Baarista iyo sharixida sharciyada Magaalada, siyaasadaha, iyo hababka.
- Siinta gole dhex-dhexaad ah oo lagu xareeyo cabashada ama ra'yi ku saabsan waax Magaalada.
- Siinta gole talantaali ah oo loogu tala-galay muwaadiniinta in ay sheegaan wal-wal ku saabsan akhlaaqda booliska. Waa aanu heli doona oo isla markana diiwaan gelin doona wal-walyada oo aan ku xarayn doona Office of Professional Accountability (OPA) (Xafiiska La Xisaabtanka Aqoonyahanada) Qaybta Baaritaanka ee loogu tala-galay in ay dib-u hubiyaan oo isla markana dabagalaan.
- Fulinta baaritaan aanan eex lahayn ee eedayntaada xaq-darooyin oo ay sameeyeen waax magaalada ah iyo talo bixinta qaadidda ficil haboon iyo/ama beddelida siyaasada waaxyaha Magaalada ama Duqa Magaalada.

- Dhex-dhexaadinta khlaafyada u-dhexeeya shakhsiga iyo waax Magaalada ah si loo helo xal raali laga wadayahay.

Waxa aynan qaban karin Customer Service Bureau

- Wax ka qabashada cabashooyinka ku saabsan sarakiisha la doortay ama shaqalahooda. Tan wax ku jira Duga Magaalada, xubnaha Gudiga magaalada, Qareenka Magaalada, Qaadiyada Maxkamada Dawladda Hoose.
- Wax ka qabashada cabashooyinka ka baxsan dawladda Magaalada (tus'aale, Deeganka King, Gobolka Washington, ama Dawladda Federaalka).
- Wax ka qabashada cabashooyinka ku saabsan ganacsiyo khaas ah ama hey'adooyin anaan faa'iido samaynin.
- Haysashada awood waaxaha Magaalada ugu bahan in ay qadaan ficil ama beddelaan siyaasada. Hase yeeshe, Xafiiska Dawladdu waxa u ku talin kara beddelidda siyaasada waaxda Magaalada ama sharciyada iyo sheegitaanka caddaalad darooyin iskood u muuqda ee bixitaanka adeega.

Haddii aan leeyahay cabasho ama codsi adeeg, maxaan sameeya?

1. Weydii Customer Service Bureau in ay ku caawiso in aad garatid qofkii aad kala xiriir lahyd wal-walkaaga.
2. Haddii aadan weli xal u heli karin arrinta ka dib markii aad la xiriirtay waaxdi haboonayd, waa aanu kula shaqaynaynaa sidi xal loo heli laha.